

# TILMAANSIIYAHA ADEEGYADA EE LOOGU TALAGALAY QOFKA NAAFADA AH EE WADDANKA U SOO GUURAY

Xarunta taageerta dadka waddanka u soo guurey ee naafada ah Hilma
Ururka foorumka naafada (Vammaisfoorumi ry)

2011

TILMAANSIIYAHA ADEEGYADA EE LOOGU TALAGALAY QOFKA NAAFADA AH EE
WADDANKA U SOO GUURAY

Qoraalkii hore:
Yodit Melaku
Xarunta taageerta dadka waddanka u soo guurey ee naafada ah Hilma
Selkokeskus
2004

Qoraalka la cusboonaysiiyey: Xarunta taageerta dadka waddanka u soo guurey ee naafada ah Hilma
FAIDD Solutions Oy
2011

Xarunta taageerta dadka waddanka u soo guurey ee naafada ah Hilma
Ururka foorumka naafada (Vammaisfoorumi ry)
info@tukikeskushilma.fi
www.tukikeskushilma.fi

## TUSMO


1 GOGOLDHIG ... 5

2 AQOONGUUD OO KU SAABSAN XUQUUQDA IYO ADEEGYADA NAAFADA ... 5

3 QORSHE KU SAABSAN ADEEGYADA IYO BAXNAANINTA DHAQANCELINTA ... 6

4 SHAQAALAHA DOWLADDA IYO QOLYAHA KALE EE WAXQABTA ... 7

4.1 Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela)
4.2 Adeegyada arrimaha bulshada
4.3 Adeegyada caafimaadka maskaxda
4.4 Afhayeenka naafada
4.5 Afhayeenka bukaanka
4.6 Wakiilka dadka tirada yar
4.7 Ururada shacabka (Järjestöt)
4.8 Shirkadaha caymiska

5 DALBASHADA ADEEGYADA ... 8

5.1 Adeegyada dalbashadooda iyo go'aamada
5.2 Abiil ka qaadashada go'aanka
5.3 Shaqaalaha waxaa waajib ku ah inay qofka xogtiisa xafidaan

6 TAAGEEROOYINKA DHAQAALE ... 9

6.1 Taageerada naafada ee qofka qaangaarka ah
6.2 Taageerada naafada ee qofka 16 sano ka yar
6.3 Taageerooyinka kharashka guriga
6.4 Lacagta baxnaaninta dhaqancelinta
6.5 Kharashka ku baxa cuntooyinka iyo dharka khaaska ah
6.6 Taageerada kharashka nolosha iyo deymanka dadka danyarta ah la deymiyo
6.7 Taageerada la qabsashada waddanka
6.8 Dhimmitaanka canshuurta naafada

7 HAWLGABYADA ... 11

7.1 Hawlgabka ugu yaraan la helo (takuueläke)
7.2 Taageerada baxnaaninta dhaqancelinta
7.3 Hawlgabka awood darrada shaqo
7.4 Taageerada daryeelka qofka hawlgabka qaata
7.5 Gunnada ilmaha ee qofka hawlgabka qaata la siiyo

8 GURYAHA ... 12

8.1 Qalabka fududaynaya ku noolaanshaha guriga iyo hawlaha guriga wax lagaga beddelayo
8.2 Deggenaanshaha meel adeegid leh

9 SOCODKA ... 13

9.1 Adeegyada gaadiidka
9.2 Qalabka caawinta socodka
9.3 Wax ka dhimidda qiimaha lagu raaco noocyada kala duwan ee gaadiidka
9.4 Baabuur aad leedahay
9.5 Hagidda aqoonta socodka

**10 CAAWIYAYAAL** 14

10.1 Caawimo shakhsi ahaaneed
10.2 Eyga dadka indhaha la' haga
10.3 Ey caawiye ah

**11 TURJUBAANNO** 15

11.1 Dadka waddanka u soo guurey (Maahanmuuttajat)
11.2 Dadka leh naafo maqalka ah, dadka leh naafo maqalka
iyo aragga ah iyo dadka leh naafo hadalka ah

**12 DARYEELKA CAAFIMAADKA** 16

12.1 Daawooyinka
12.2 Caddadka ugu badan ee kharashka daryeelka caafimaadka

**13 BAXNAANINTA DHAQANCELINTA IYO QALABKA CAAWINTA** 16

13.1 Tababarka la qabadsiinta
13.2 Qalabka caawimada

**14 WAXBARASHO** 17

14.1 Barashada af Finnishka
14.2 Xirfad doorasho
14.3 Iskuullada khaaska ah ee xirfadaha
14.4 Caawiyayaal
14.5 Taageerada safarka iskuulka
14.6 Taageero ah dhaqaale lagu noolado wakhtiga waxbarashada

**15 SHAQO** 19

15.1 Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashada
15.2 Waxqabad shaqo oo baxnaaninta dhaqancelinta ah
15.3 Shaqo la taageeray
15.4 Dib u dhigashada hawlgabka

**16 QOYSKA** 20

16.1 Haynta carruurta
16.2 Adeegga guriga
16.3 Taageerada haynta ehelka
16.4 La talin iyo taageerid

**17 WAKHTIGA FIRAAQADA AH** 21

**18 MEELAHA LAGALA SOO XIRRIRO** 22

**19 TIXRAAC** 24

## 1 GOGOLDHIG

Tilmaansiiyaha adeegyada ee naafada waddanka u soo guurtay wuxuu sheegayaa waxyaabaha ku saabsan adeegyada naafada loogu talagalay, badbaadada bulshada (sosiaaliturva), waxbarashada iyo shaqada ee Finland gudeheeda. Waxyaabahan oo dhan waxay saamayn ku yeeshaan waxyaabaha nolosha caadiga ah la xiriira ee qofka naafada ah ee waddanka u soo guuray ee Finland ku nool.

Ma aha inay naafadu qofka ka horistaagto waxbarashada, shaqada, saaxiibada la kulankooda, hiwaayadaha ama inuu qoys yeesho. Tilmaansiiyahani wuxuu ka warramayaa adeegyada loogu talagalay, inay qofka naafada ah caawiyaan, si uu sida ugu suuragalsan ugu noolaado nolo buuxda.

Tilmaanbixiyahan waxaa loogu talagalay inuu caawiyo oo wararka uu ka raadsado, qofka ay tusaale ahaan luuqadda oo dhibaato ku ah darteed ku adag tahay, inuu warka meel kale ka helo.

## 2 AQOON GUUD OO KU SAABSAN XUQUUQDA IYO ADEEGYADA NAAFADA

Waddanka Finland waxaa ka jira sharciyo badan oo kala duwan oo loo dejiyey adeegyada naafada. Sharciyadaasi waxay sheegayaan, siday tahay in adeegyada naafada loo qabanqaabiyo iyo qofka adeegyada heli kara.

**Sharciga u adeegga naafadu** wuxuu sheegayaa noocyada adeegyada ee ay degmada waaxdeeda sooshalka waajibka ku tahay inay u qabanqaabiso dadka degmada deggan.
Sharciga muhiimadiisu waa inay degmada waajib ku tahay, inay hadba sida loogu baahan yahay u qabanqaabiso adeegyada naafada.

Adeegyada qaarkood waxay noqon karaan kuwo qofka degmada ka tirsan uu si toos ah xaq ugu leeyahay. Taas oo macneheedu yahay, haddii qofka macaamiisha ah uu buuxinayo shuruudaha adeeggaas lagu helo, degmada waxaa waajib ku ah, inay adeegga qabanqaabiso.
Degmadu sabab kama dhigan karto, in aanay hayn lacag ku filan oo ay adeegga ku qabanqaabiso. Hase yeeshee adeegyada ah kuwa ka fekeridda ku xiran, degmadu iyagoo ka fekerkeeda ku xiran bay qabanqaabin kartaa.

**Sharciga naafada koriinka** (Kehitysvammalaki) ayaa dhigaya in si gaar ah loo daryeelo dadka naafada koriinka ah. Daryeelka gaarka ah waxaa tusaale ahaan ka mid ah, adeegyada degenaanshaha ee dadka naafada koriinka ah. Badanaa qofka naafada koriinka ah adeegyada uu u baahan yahay qaarkood wuxuu helaa iyagoo uu sal u yahay sharciga u adeegidda naafada, qaarkoodna wuxuu helaa iyagoo uu sal u yahay sharciga u adeegidda naafada koriinka.

Ujeedada daryeelka gaarka ah waa in dadka naafada ah la caawiyo oo la taageero, si ay nolosha caadiga ah iyagu isu debberaan. Daryeelka gaarka ah waxaa go'aan lagaga gaaraa waxyaabaha ku saabsan adeegyada ah waxyaabaha la sameeyo iyo taageerooyinka dhaqaale.

**Sharciga sinnaanta** ayaa wuxuu dhigayaa in aan qofna la
takoori karin oo aan tusaale ahaan shaqada iyo waxbarashada qofna loo takoori karin naafo uu yahay ama asalka uu ka soo jeedo dartiis.

**Sharciga bukaanku (Potilaslaki)** wuxuu khuseeyaa
daryeelka caafimaadka. Sharciga bukaanku wuxuu dhigayaa, in aan qofna la daaweyn karin, haddii aanu isagu raalli ka ahayn. Qofka bukaanka ah

haddii aanu ku qanacsanayn daaweynta, meesha daaweynta buu xusuusin ama dacwo u soo gudbin karaa. Goobaha daaweynta waxaa ka shaqeeya dad ah afhayeennada bukaanka, kuwaas oo dadka ka caawiya sida xusuusinta loo sameeyo.

Sharciga macaamiishu (Asiakaslaki) wuxuu khuseeyaa adeegyada arrimaha bulshada (sooshalka). Sharcigu wuxuu dhigayaa, in qofka ah macaamiisha adeegyada arrimaha bulshada si fiican loola dhaqmo. Adeegyada marka la qabanqaabinayana waa in la tixgeliyaa qofka macaamiisha ah baahidiisa iyo dantiisa. Qofka macaamiisha ah haddii uu ku qanci waayo adeegyada arrimaha bulshada, wuxuu la xiriiri karaa degmada afhayeenkeeda macaamiisha arrimaha bulshada (sosiaaliasiamies). Afhayeenka arrimaha bulshadu wuxuu qofka ka caawin karaa tusaale ahaan sida xusuusinta luu sameeyo.

**Sharciga la qabsashada waddanka** hadafkiisu waa in hore loo mariyo dadka waddanka u soo guurey la qabsashadooda waddanka, sinnaanta ay dadka kale la siman yihiin iyo inay xor u yihiin waxay dooranayaan.
La qabsashada waddanka waxa loola jeedaa waa in qofka waddanka u soo guurey uu Finland ka qaybqaadan karo nolosha shaqo iyo waxqabadka bulshada, isla markaasna uu weli haysto afkiisa hooyo iyo dhaqankiisa.

**Adeegyada naafada** ujeedadoodu waa in dadka naafada ah la caawiyo si ay nolol madax bannaani leh ugu noolaan karaan, si sinnaan lehna uga qaybqaataan waxqabadka bulshada.

Finland adeegyada naafada qabanqaabintooda waxaa u xilsaaran degmada. Degmada uu qofku ka tirsan yahay waa degmada uu sida joogtada ah u deggan yahay. Qaybta degmada u qaabilsan adeegyada naafada ayaa dadka naafada ah iyo ehelkoodaba kala talisa arrimaha la xiriira adeegyada naafada.

Dadka naafada ah waxay taageero dhaqaale ka helaan Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela).

## 3 QORSHE KU SAABSAN ADEEGYADA IYO BAXNAANINTA DHAQANCELINTA

Qofka naafada ah si wadajir ah ayuu sooshalka degmadiisa ula samaynayaa **qorshaha adeegga**. Qorshaha waxaa lagu go'aamiyaa adeegyada uu qofka naafada ah u baahan yahay noocyada ay yihiin. Qofka naafada ah ehelkiisuna way ka qaybqaadan karaan dejinta qorshaha adeegga. Shaqaalaha kale ee maamulka ee degmadu haddii loo baahdo way ka qaybqaadan karaan dejinta qorshaha. Qorshaha adeegga waxaa loo magacaabaa qof shaqaale ah oo masuul ka ah oo u xilsaaran in qorshuhu siduu yahay loo fuliyo.

Si uu qofku u helo baxnaanin dhaqancelin ah, waxaa loo baahan yahay **Qorshaha baxnaaninta.** Qorshaha waxaa lagu go'aamiyaa baxnaaninta dhaqancelinta ee qofka naafada ah u baahan yahay nooca ay tahay. Qorshaha baxnaaninta dhaqancelinta waxaa wada dejiya qofka naafada ah iyo cidda daryeelkiisa u xilsaaran.

Qofka waddanka u soo guurey wuxuu **qorshaha la qabsashada waddanka** xaq u leeyahay:

- haddii uu shaqo la'aan yahay oo uu shaqo raadinayo ama
- haddii uu qaato taageerada dhaqaalaha nolosha ee sooshalku bixiyo ama
- haddii marka bilowga hore xaaladiisa la qiimaynayo la arko in qorshaha loo baahan yahay.

Qiimaynta hore ee xaaladda lagu ogaanayo waxaa bilowga hore ee uu qofku waddanka u soo guuro loo sameeyaa dadka ah kuwa waddanka u soo guurey ee shaqo la'aanta ah iyo kuwo qaata taageerada dhaqaalaha nolosha ee sooshalku bixiyo iyo kuwa iyagu codsada in qiimaynta hore loo sameeyo.
Qof walba oo waddanka u soo guurey looma sameeyo qiimaynta hore ee xaalkiisa lagu ogaanayo ama qorshaha la qabsashada waddanka.

Qorshaha la qabsashada waddanka ujeedadiisu waa in qofka lagu caawiyo sidii uu Finland ula qabsan lahaa. Qorshuhu waxyaabaha uu ka kooban yahay waxay noqon karaan tusaale ahaan, koorsooyin af Finnish ah, baxnaanin dhaqancelin ah iyo hagitaan ah xirfad doorasho.

## 4 SHAQAALAHA DOWLADDA IYO QOLYAHA KALE EE WAXQABTA

### 4.1 Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela)

Hay'adda Hawlgabka Qaranku (Kela) waxay dadka Finland deggan siisaa taageero lacageed oo ay bixiso markay dadku ku jiraan xaaladaha nolosha ee kala duwan. Caadi ahaan Kela waxay badbaadada dhaqaale ee aasaasiga ah bixisaa, markay dakhliyada kale ee qofka soo galaa yar yihiin.

Taageerada ay Kela bixiso waxaa sida caadiga ah hela qofka ka tirsan badbaadada daryeelka bulshada ee Finland. Badbaadada daryeelka waxaa xaq u leh qof walba oo Finland si joogto ah u deggan.

Kela waxyaabaha ay u xilsaaran tahay waxaa ka mid ah tusaale ahaan, dadka naafada ah baxnaanintooda dhaqancelinta ah, bixinta noocyada kala duwan ee taageerooyinka ah iyo weliba qofka shaqo la'aanta ah badbaadadiisa dhaqaale ee aasaasiga ah.

Taageerooyinka Keladu bixiso qaar ka mid ah waxaa la xiriira shuruud ah in waddanka wakhti la deggenaa. Taas oo macneheedu yahay qofku markuu ugu yaraan wakhti cayiman oo loo qabtay waddanka deggan yahay buu heli karaa taageerada.

Caymiska bukaanka ee Kela waxaa sida caadiga ah ku jira dadka Finland sida joogtada ah u deggan oo dhan. Finland dadka ku jira caymiska bukaanka waxaa la siiyaa kaarka caymiska bukaanka (Kela-kortti). Kaarka markaad haysato farmashiyaha iyo rugaha dhakhaatiirta ee barayfitka ah badankoodu lacagtii ay kaa qaadi lahaayeen qayb ka mid ah waxaa bixinaya Kela. Markaas adigu waxaad bixinaysaa inta kugu soo aadda oo keliya. Kaarka caymiska bukaanku waa lacag la'aan.

Dadka lacagta hawlgabka ah qaataa waxay Keladu siisaa kaarka la siiyo dadka hawlgabka qaranka qaata (kansaneläkkeensaajan kortti). Kaarka markaad haysato waxaad helaysaa qiimojebinta dadka hawlgabka ah loo ogolaado, tusaale ahaan gaaddidka dadweynaha tikidkooda qiimihiisa wax baa lagaa dhimayaa. Qofka hawlgabka qaranka codsada, marka loo ogolaado hawlgabka qaranka oo buuxa, kaarka (kansaneläkkeensaajan kortti) si toos ah baa loogu soo diraa. Kaarka la siiyo dadka hawlgabka qaranka qaata (kansaneläkkeensaajan kortti) waa lacag la'aan.

### 4.2 Adeegyada arrimaha bulshada

Degmadu iyadaa dadkeeda u qabanqaabisa adeegyada arrimaha bulshada. Adeegyadaas waa tusaale ahaan sia adeegyada loogu talagalay dadka naafada ah iyo dadka waayeelka ah, xannaano maalmeedka carruurta iyo taageero dhaqaale.

Shaqaalaha sooshalka ee degmada ayaa caawiya dadka degmada deggan ee ku jira xaalad nololeed adag. Shaqaalaha sooshalku wuxuu dadka kala taliyaa arrimaha kala duwan, wixii hagitaan ahna wuu siiyaa.

### 4.3 Adeegyada caafimaadka maskaxda

Markay jiraan xaalado dhibaatooyin nolosha ah, caawimo waxaa laga helaa adeegyada caafimaadka maskaxda. Qofku dhibaatooyin uu la soo kulmay oo noqon kara inuu qoyskiisii ama ehelkiisii waayey ama jirdil isaga lagu sameeyey ama sababo kale dartood baa waxaa dhici karta inuu dareemo culays xagga nolosha ah.

Degmadu iyadaa dadkeeda u qabanqaabisa adeegyada caafimaadka maskaxda. Caawimo waxaa laga raadsan karaa, tusaale ahaan xarumaha caafimaadka (terveyskeskus), bolikilinigyada saykaateriga (psykiatrinen poliklinikka) iyo rugaha daryeelka hooyada iyo carruurta (neuvola).
Adeegyada caafimaadka maskaxda waxaa iyana qabanqaabiya iskuullada, goobaha waxbarashada iyo goobaha daryeelka caafimaadka shaqaalaha (työterveyshuolto).

### 4.4 Afhayeenka naafada

Magaalooyinka qaarkood waxaa ka shaqeeya **afhayeenka naafada (vammaisasiamies)**. Afhayeenka shaqadiisu waa inuu difaaco dadka naafada ah xuquuqdooda aasaasiga ah iyo inuu dadka kala taliyo arrimaha naafada.

Magaalooyinka ay ka midka yihiin Helsinki, Espoo iyo Tampere waxaa ka shaqeeya oo ay leeyihiin afhayeennada naafada.

### 4.5 Afhayeenka bukaanka

Unug walba oo daryeelka caafimaadka ah waxaa ka shaqeeya afhayeenka bukaanka.
Afhayeenka shaqadiisu waa inuu dadka macaamiisha ah kala taliyo arrimaha la xiriira xuquuqda qofka bukaanka ah leeyahay. Qofka bukaanka ah haddii uu ku qanci waayo daryeelka uu helayo,

afhayeenka bukaanka ayaa ka caawiya, inuu sameeyo xasuusin cabasho ah ama dacwo.

### 4.6 Wakiilka dadka tirada yar

Wakiilka dadka tirada yar waa shaqaale dowladeed oo hore u mariya xuquuqda sinnaanta ee dadka asal ahaan kooxo yar ka soo jeeda iyo dadka ajnebig ah Finland ku leeyihiin Wakiilka dadka tirada yar waxaa lala soo xiriiri karaa, haddii lala kulmo takoorid asalka uu qofku ka soo jeedo ku salaysan ama haddii la dareemo in dad kale takoorid lagu samaynayo.

Faahfaahin dheeraad ah:
www.vahemmistovaltuutettu.fi

### 4.7 Ururada shacabka (Järjestöt)

Ururada naafada iyo ururada dadka dhaqamada kale ka soo jeeda waxaa laga heli karaa talooyin, caawimo iyo taageero.

Ururada naafadu waxay hore u mariyaan xuquuqda sinnaanta ee dadka naafada ah leeyihiin.
Ururadu waxay bixiyaan

- waxyaabaha naafada la xiriira talooyinkooda iyo hagidooda
- waxqabadyo hiwaayad iyo waxyaabaha wakhtiga firaaqada ah
- taageero dad isu dhigmaa isa siinayaan (vertaistuki).

Ururada dadka dhaqamada kale ka soo jeeda waxay qabanqaabiyaan waxyaabo ay ka mid yihiin waxqabadyo jimicsi iyo dhaqanka fanka ah, waxayna hore u mariyaa dhaqamada kala duwan iyo la qabsashada Finland.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa ururada shacabka.

### 4.8 Shirkadaha caymiska

Dad badan oo Finnish ah ayaa gala caymiska loogu talagalay shil lama filaan ah hadduu dhaco. Caymisyada waxaa laga gataa shirkadaha caymiska.

Shirkadaha caymisku waxay gadaan (iibiyaan) tusaale ahaan caymiska guriga iyo caymiska safarka. Waxaa kaloo la geli karaa caymiska loogu talagalay haddii shil ama dhimasho timaado. Shirkadaha caymisku iyagaa go'aamiya qofka caymiska heli kara iyo caymisku qiimaha uu joogo.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa shirkadaha caymiska.

## 5 DALBASHADA ADEEGYADA

### 5.1 Adeegyada dalbashadooda iyo go'aamada

Adeegyada si loo helo, waa in la dalbadaa. Degmada ama Kelada markaad adeeg ka dalbanayso, waxaa wanaagsan inaad si qoraal ah u dalbato. Badanaa adeegyada waxaa lagu dalbadaa foom loogu talagalay. Foomka waxaa lagu sii lifaaqaa (la raaciyaa) tusaale ahaan, warbixinta dhakhtarku soo qoray (lääkärinlausunto).

Shaqaalaha maamulka waajib bay ku tahay, inay ku siiyaan talooyinka ah sida adeegyada loo dalbado. Shaqaalaha maamulku si qoraal ahaan ah bay uga soo jawaabaan codsiga adeegga lagu soo dalbaday. Jawaabta waxaa ku qoran shaqaalaha maamulku go'aanka uu gaaray iyo waxyaabaha go'aanka salka u ah.

### 5.2 Abiil ka qaadashada go'aanka

Qofka macaamiisha ah haddii aanu ku qanacsanayn go'aanka uu shaqaalaha maamulku soo gaaray, sida caadiga ah go'aanka abiil baa laga qaadan karaa oo waxaa la dalban karaa, in go'aanka la beddelo. Go'aanka waxaa la socda war ku in go'aanka abiil laga qaadan karo iyo in kale. Go'aanka haddii aad abiil ka qaadanayso, waxaa fiican, inaad markaad go'aanka hesho, isla markiiba abiil ka qaadato.

Qofka macaamiisha ah haddii uu u baahan yahay in laga caawiyo sida abiilka loo qaato, wuxuu talo weydiisan karaa degmada afhayeenkeeda arrimaha bulshada (sosiaaliasiamies). Afhayeenka arrimaha bulshada shaqadiisu waa inuu dadka u sheego macaamiishu xuquuqda ay leeyihiin iyo markuu khilaaf jiro, inuu dadka macaamiisha ah la taliyo.

Daryeelka caafimaadka go'aamadooda daaweynta ku saabsan abiil lagama qaadan karo. Hase yeeshee haddii aadan ku qanacsanayn adeegyada daryeelka caafimaadka, waxaad samayn kartaa xusuusin cabasho ah ama dacwo. Wixii talo ah waxaad weydiisaa afhayeenka bukaanka.

### 5.3 Shaqaalaha waxaa waajib ku ah inay qofka xogtiisa xafidaan

Shaqaalaha maamulka waxaa waajib ku ah inay qofka xogtiisa xafidaan.
Taas macneheedu waa, shaqaaluhu maamulku arrimaha khuseeya qofka macaamiisha ah cid kale oo aan arrinka shaqo ku lahayn uma sheegi karaan. Hase yeeshee qofka shaqaalaha maamulka ah arrinka wuu kala xaajoon karaa dad kale oo iyana shaqaalaha maamulka ah, haddii ay yihiin shaqaale in wadashayn lala sameeyo uu sharcigu ogol yahay.

Waajibaadka xafidaadda xogtu xitaa wuxuu khuseeyaa qoyska:
qofka shaqaalaha maamulka ah arrimaha qofka macaamiisha ah khuseeya uma sheegi karo xitaa qofka dadka qoyskiisa ah, qofka macaamiisha ah inuu ogolaado mooyee.

## 6 TAAGEEROOYINKA DHAQAALE

Qofka naafada ah wuxuu dalban karaa taageerooyin kala duwan oo ka caawinaya sidii uu isaga bixin lahaa kharashka naafada ama jirrada darteed ugu soo kordha.

### 6.1 Taageerada naafada ee qofka qaangaarka ah

Taageerada naafada waxaa loogu talagalay dadka naafada ah ee weli ku jira da'da shaqada ee aan weli qaadan lacagta hawlgabka. Qofka in loo ogolaado taageerada naafada waxaa saamayn ku yeesha, taageero codsadaha da'diisa, muddada uu Finland deggenaa iyo wakhtiga uu naafoobey.

Taageerada naafada ee qofka loo ogolaanayaa waxay noqon kartaa mid joogto ah ama mid wakhti go'an ku eg. Caddadka taageeradu wuu kala duduwan yahay oo wuxuu ku xiran yahay naafadu intay le'eg tahay. Taageerada naafada Kelada ayaa laga codsadaa, waxaana loo baahan yahay, in codsiga lagu soo lifaaqo warbixinta dhakhtarka ee ah nooca C ama B. Taageerada naafada canshuur lagama gooyo.

### 6.2 Taageerada naafada ee qofka 16 sano ka yar

Ilmaha muddo dheer jirran ama naafada ah waalidkii waxay Kelada ka dalban karaan taageerada naafada ee qofka 16 sano ka yar. Taageerada waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo kharashka ka yimaada ilmaha daryeelkiisa iyo baxnaanintiisa dhaqancelinta ah.

ATaageerada naafada ee qofka 16 sano ka yar waa canshuur la'aan. Caddadkeedu wuu kala duwan yahay oo wuxuu ku xiran yahay naafadu intay le'eg tahay. Taageerada Kelada ayaa laga codsadaa, waxaana loo baahan yahay, in codsiga lagu soo lifaaqo warbixin dhakhtar oo ah nooca C.

### 6.3 Taageerooyinka kharashka guriga

**Taageerada guud ee kharashka guriga** waxaa heli kara dadka dhaqaalaha soo galaa yar yahay ee deggan guri kiro ah ama guri ay leeyihiin. Taageerada kharashka guriga waxaa loogu talagalay inay daboosho qayb ka mid ah kharashka guriga, sida kirada qayb ka mid ah, kululaynta guriga iyo kharashka biyaha. Caddadka taageeradu wuxuu ku xiran yahay dakhliga soo gala qofka guriga deggan.

**Taageerada kharashka guriga ee hawlgab qaatayaasha** waxaa heli kara dadka hawlgabka ah ee Finland deggan ee dakhliga soo galaa yar yahay.

Labada nooc ee taageerada kharashka guriga ahba waxaa laga dalbadaa Kelada.

### 6.4 Lacagta baxnaaninta dhaqancelinta

Lacagta baxnaaninta dhaqancelinta ujeedada laga leeyahay waa in qofka naafada ah la caawiyo si uu waxyaabaha nolosha caadiga ah ee maalin walba jira isaga debero iyo in awoodiisa waxqabsasho la sii fiicnaysiiyo. Haddii aad naafo ama jirro darteed u baahan tahay baxnaanin dhaqancelin, waxaad codsan kartaa lacagta baxnaaninta dhaqancelinta. Lacagta baxnaaninta dhaqancelinta waxaa heli kara dadka Finland deggan ee da'doodu u dhaxayso
16–67 sano, haddii baxnaaninta dhaqancelintu keeneyso inuu qofku lumiyo dhaqaale ka soo geli jirey shaqada.

Lacagta baxnaaninta dhaqancelinta Kelada ayaa laga codsadaa, canshuur ayaana laga gooyaa. Codsiga waxaa loo baahan yahay, in lagu lifaaqo go'aanka baxnaaninta dhaqancelinta ee qolada baxnaaninta qabanqaabinaysaa soo gaartay.

### 6.5 Kharashka ku baxa cuntooyinka iyo dharka khaaska

Qofka naafada ah taageero dhaqaale ayuu dalban karaa, haddii naafadiisa ama jirro darteed ay khasab ku noqoto inuu isticimaalo cuntooyin khaas ah. Qofku wuxuu kaloo dalban karaa, in laga caawiyo kharashka dharka ku baxa, haddii naafadiisa ama jirro darteed aanu dharka iyo kabaha caadiga ah isticimaali karin.

Taageerada dhaqaale waxaa laga dalbadaa xafiiska sooshalka ee degmada.

### 6.6 Taageerada kharashka nolosha iyo deymanka dadka danyarta ah la deymiyo

Xafiiska sooshalka ayaa taageerada kharashka nolosha bixiya, haddii qofku ama qoysku aan meel kale ka helin dhaqaale uu ku noolaado. Taageerada kharashka nolosha waxaa la helaa oo keliya, haddii qofka ama qoyska dakhliyada iyo taageerooyinka kale ee soo galaa ay yar yihiin.

Taageerada kharashka noloshu waa kharaska nolosha ee ugu dambeeya ee la codsado, marka si kale loo heli waayo dhaqaale lagu noolaado.

Dakhliyada kale ee qofka/qoyska soo galaa saamayn bay ku yeeshaan caddadka taageerada kharashka nolosha. Hase yeeshee taageerada naafadu saamayn kuma yeelato caddadka taageerada kharashka nolosha.

Degmooyinku waxay dadkooda u ogolaan karaan deyn dadka danyarta ah la deymiyo (sosiaalinen laina) ee loogu talagalay in la siiyo dadka aan dhaqaalaha fiican lahayn ee ay ku adag tahay in meel kale deyn ka helaan. Qofka deynka la siiyey, deynka wuxuu u soo celinayaa degmada. Deynka daka danyarta ah la deymiyo waxaa laga codsadaa xafiiska sooshalka ee degmada.

### 6.7 Taageerada la qabsashada waddanka

Qofka waddanka u soo guurey wuxuu inta lagu jiro wakhtiga qorshaha la qabsashada waddanka xaq u leeyahay taageerada la qabsashada waddanka. Taageerada la qabsashada waddanku waxay u dhigantaa taageerada suuqa shaqada (lacagta shaqo la'aanta) ama taageerada kharashka nolosha.

Taageerada la qabsashada waddanka waxaa laga dalbadaa Kelada ama xafiiska sooshalka ee degmada.

### 6.8 Dhimmitaanka canshuurta naafada

Naafanimaa darteed qofku wuxuu heli karaa in canshuurta wax laga dhimo (invalidivähennys). Caddadka canshuurta laga dhimayaa waxay ku xiran tahay cilladda naafadu ama jirradu keenayso intay le'eg tahay. Cilladdu hadday yar tahay, canshuurta inta laga dhimayaa way yar tahay.

Haddii aad dalbanayso canshuurta naafada laga dhimo, soo sheegidda canshuurta (veroilmoitus) waxaad ku soo lifaaqdaa warbixin dhakhtar oo muujinaysa cilladdu intay le'eg tahay. Markaas wixii ka dambeeya xafiiska canshuuruhu si otomaatig ah buu canshuurta kaaga dhimayaa. Haddii cilladu siday tahay wax iska beddelaan, waa inaad xafiiska canshuuraha u soo sheegtaa.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa xafiiska canshuuraha.

## 7 HAWLGABYADA

Lacagta hawlgabka waxaa qaata dadka aan shaqayn ee waayeelnimo ama awood darro shaqo darteed aan shaqayn karin.

Waxaa jira noocyo badan oo hawlgab ah. Dadka waayeelka ah ee Finland deggan waxay heli karaan **hawlgabka waayeelka** (vanhuuseläke**)**. Hawlgabkaas waxaa ku jiri kara **hawlgabka shaqada** (ansioeläke), haddii qofku uu muddo dheer soo shaqayn jiray. Hawlgabka shaqadu wuxuu qofka u ururaa isagoo ku xiran mushaharka qofka ka soo gala shaqada. Qofku haddii aanu qaadan jirin mushahar oo hawlgabka shaqadu aanu u ururin, markuu da'da hawlgabka gaaro wuxuu heli karaa **hawlgabka qaranka** (kansaneläke).

Waxaa jira waxyaabo xadida helitaanka hawlgabyada. Hawlgabyada qaarkood helidooda waxaa saamayn ku yeelan kara muddada uu qofka hawlgabka dalbanayaa Finland deggenaa.

### 7.1 Hawlgabka ugu yaraan la helo (takuueläke)

Hawlgabka ugu yaraan la helo waa lacagta hawlgabka ah ee ugu yar ee la siiyo dadka hawlgabka ah ee dakhliga soo galaa yar yahay. Hawlgabka ugu yaraan la helo qofku wuxuu heli karaa, haddii markay 16 sano u buuxsantay ka dib uu Finland deggenaa ugu yaraan 3 sano.

Hawlgabka ugu yaraan la helo waxaa laga codsadaa Kelada. Hawlgabka noocan ah lacagtiisu intay noqonayso wuxuu ku xiran yahay noocyada kale ee hawlgabka ah ee codsaduhu uu qaato.

### 7.2 Taageerada baxnaaninta dhaqancelinta

Taageerada baxnaaninta dhaqancelinta waxaa la dalban karaa iyadoo wakhti go'an ku eg, haddii awoodda shaqayntu si ku meelgaar ah u daciiftay. Qofka waxaa taageerada inuu helo loo ogolaadaa muddada daryeelka iyo baxnaaninta dhaqancelintu socdaan oo ah ilaa ay qofka taageerada qaata u suuroobeyso inuu shaqada ku noqdo. Taageerada waxaa laga dalbadaa Kelada ama Hay'adda hawlgabka shaqada (Työeläkelaitos).

### 7.3 Hawlgabka awood darrada shaqo

Haddii naafo ama jirro darteed aanu qofku dib dambe u awoodin inuu shaqeeyo, qofkaas waxaa loo ogolaan karaa hawlgabka awood darrada shaqo. Qofka da'diisu ka yar tahay 20 sano ma heli karo hawlgabkaas ilaa inta laga hubsanayo in awoodiisa shaqo aanay ku soo noqon karin baxnaaninta dhaqancelinta. Hawlgabka awood darrada shaqada waxaa laga dalbadaa Kelada ama Hay'adda hawlgabka shaqada (Työeläkelaitos).

### 7.4 Taageerada daryeelka qofka hawlgabka qaata

Qofka hawlgabka qaataa wuxuu heli karaa taageerada daryeelka oo loogu talagalay inuu iskaga bixiyo kharashka ka yimaada daryeelka ama adeegyada kala duwan ee uu u baahan yahay. Taageerada daryeelka waxaa kaloo lagu caawiyaa qofka naafada ah ama jirran, si uu isagoo gurigiisa deggan si fiican isugu debberi karo.

Taageerada daryeelka waxaa laga dalbadaa Kelada, canshuurna lagama gooyo.

### 7.5 Gunnada ilmaha ee qofka hawlgabka qaata la siiyo

Qofka hawlgabka qaata ee haysta carruur 16 sano ka yar, wuxuu heli karaa gunnada ilmaha dartood loogu kordhiyo. Gunnada waxaa laga dalbadaa Kelada, canshuurna lagama gooyo.

## 8 GURYAHA

Hadafku waa in Finland dadka naafada ah ay ilaa intii suuragal ah iyagu noloshooda si madax bannaani leh isu deberaan. Dadka naafada ah waxay deggenaan karaan guryahooda ama guryaha adeegga (palvelutalo). Mararka qaar waxay noqotaa in guriga dhismihiisa wax laga beddelo ama la keeno alaabooyin ama qalab qofka naafada ah u fududaynaya inuu iskiisi su debero oo guriga ugu noolaan karo. u dhisan yahay. Wax ka beddelidda dhismaha guriga iyo keensashada qalabka qofka noloshiisa fududaynaya, waxaa loo heli karaa taageero lacageed.

### 8.1 Qalabka fududaynaya ku noolaanshaha guriga iyo hawlaha guriga wax lagaga beddelayo

Dadka aad naafada u ah degmada ayey ka heli karaan taageero lagaga taageerayo siday u heli lahaayeen qalabka caawinaya ee u fududaynaya siday guriga ugu noolaan lahaayeen. Qalabkaasi waxay noqon karaan tusaale ahaan, qalabka yeeridda (hälytinjärjestelmä) ee caawiya dadka dhegaha aad naafada uga ah, ama wiishka jaranjarada ku samaysan ee loogu talagalay dadka naafadoodu tahay xagga socodka. Taageerada ujeedada laga leeyahay waa in la caawiyo dadka naafada ah, si ay ilaa intii suuragal ah si xornimo leh oo ay iyagu isdeberayaan ugu noolaan karaan gurigooda.

Badanaa waxaa khasab noqota, in guriga dhismihiisa wax laga beddelo oo dib u habayn lagu sameeyo, si uu u noqdo guri ku haboon qof aad naafo u ah inuu ku noolaan karo. Kharashka ku baxa wax ka beddelidda siduu gurigu yahay, waxaa qofka laga bixiyaa, haddii qofka naafadiisa ama jirradiisa darteed ay wax ka beddelidda dhismaha gurigu lagama maarmaan tahay, si uu qofka naafada ah gurigiisa ugu noolaan karo. Qofka waxaa laga bixin karaa tusaale ahaan, kharashka ballaarinta albaabada, wax ka beddelidda habka iftiinka guriga ama dhisidda meelaha loogu talagalay kursiga curyaamiintu inuu mari karo.

Magdhowga iyo taageerooyinka la xiriira kharashka guriga ku baxa waxaa laga dalbadaa degmada waaxdeeda adeegyada naafada.

### 8.2 Deggenaanshaha meel adeegid leh

Haddii qofka naafada ah u baahan yahay caawimo badan si uu isaga debero waxyaabaha nolol maalmeedka caadiga ah, waxaa xal fiican noqon kara, in qofka la dejiyo meel adeegid leh.
Qofka naafada ah wuxuu tusaale ahaan ku noolaan karaa gurigiisa, halkaas oo uu ku helayo adeegyo iyo waxqabadyo taageero oo ku filan. Guriga uu qofku deggan yahay wuxuu kaloo noqon karaa mid ku yaalla dhismo ah guryaha adeegga (palvelutalo), halkaas oo ay deggan yihiin dad kale oo iyaguna u baahan in lagu taageero si ay iskood guri ugu deggenaan karaan. Qofka dhismaha noocaas ah deggan wuxuu guriga adeegga ka heli karaa caawimo ah tusaale ahaan xagga cuntaynta, qubeyska iyo daryeelka caafimaadka.

Guriga adeegg (palvelutalo) qofka deggan wuxuu leeyahay dhammaan xuquuqda iyo waajibaadka caadiga ah ee qofka guryaha caadiga ah deggan leeyahay.

## 9 SOCODKA

### 9.1 Adeegyada gaadiidka

Degmadu dadkeeda aad naafada u ah waxay u qabanqaabisaa adeegyo ah gaadiid ay raacaan, haddii naafadu tahay mid keenaysa, inay dadka aad ugu adag tahay, inay gaadiidka dadweynaha raacaan. Qofka aad naafada u ah wuxuu adeegyada gaadiidka isticimaali karaa si uu shaqada ama waxbarashada u aado oo uga soo noqdo iyo markuu tegayo meelaha uu wakhtiyada firaaqada ah tago. Sharciga ayey ku qoran tahay, caddadka safaradda ee qofku heli karo. Adeegyada gaadiidka qiimaha lagu raacaa wuxuu sida caadiga ah la mid yahay qiimaha lagu raaco gaadiidka dadweynaha.

Adeegyada gaadiidka waxaa laga dalbadaa qofku degmada uu ka tirsan yahay waaxdeeda adeegyada naafada qofka sooshalka ka ah.

### 9.2 Qalabka caawinta socodka

Haddii aad naafo ama jirro darteed ugu baahan tahay qalabka caawinta socodka, degmada ayaad ka heli kartaa iyagoo lagu deyminayo ama lahaansho laguu siinayo. Qalabka caawinta socodku waxaa ka mid ah tusaale ahaan, kursiga shaagagga leh (kursiga curyaamiinta), ulaha lagu tukubo iyo gaariga lagu socdo ee la riixdo (rollaattori).

### 9.3 Wax ka dhimidda qiimaha lagu raaco noocyada kala duwan ee gaadiidka

Gaadiidka dadweynuhu wuxuu kooxo dadka ka mid ah u ogolaadaa in wax laga dhimo qiimaha gaadiidka lagu raaco. Tusaale ahaan ardayda iyo dadka hawlgabka ah waxay heli karaan in wax laga dhimo qiimaha lagu raaco tareemada, basaska iyo gaadiidka cirka. Faahfaahin dheeraad ah oo dhimidda qiimaha ku saabsan waxaa laga helaa waaxda gaadiidka dadweynaha ee degmada.

**Tareemada:** Shirkadda Tareemada Dowladdu (VR = Valtion Rautatie) waxay ardayda iyo dadka hawlgabka ah qiimaha tikidhada tareemada ka dhintaa boqolkiiba 50. Faahfaahin dheeraad ah weydii xafiiska tikidhada ee VR. Haddii aad xaq u leedahay inaad isticimaasho qof ku kexeeya, waxaa suuragal ah in qofka ku kaxaynaya la siiyo tikidh lacag la'aan ah.

**Basaska:** Gaadiidka Basaska Gobolladu (Matkahuolto) waxay dadka hawlgabka ah qiimaha tikidhka baska ka dhimaan boqolkiiba 30. Safarku waa inuu ahaadaa hal jiho (one way) uuna yahay ugu yaraan 80 km. Ardayga qiimaha safarka waxaa laga dhimaa boqolkiiba 50. Faahfaahin dheeraad ah weydii Gaadiidka Basaska Gobolada (Matkahuolto).

**Diyaaradaha:** Shirkadaha diyaaradaha qaarkood, sida Finnair waxay dadka hawlgabka ah iyo dadka naafada ah u ogolaadaan in qiimaha tikidhka diyaarada wax laga dhimo. Qofka hawlgabka ah ama naafada ah qofka wadaana wuxuu heli karaa, in qiimaha tigidhka wax laga dhimo. Qiimaha tikidhka diyaarada layska dhimaa waa safarada Finland gudeheeda.

Shirkadaha diyaaradaha qaarkood waxaa laga heli karaa in qof shaqaalahooda ka mid ah si lacag la'aan ah kuugu caawiyo garoonka diyaaradaha. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan qiimaha tikidhka layska dhimo iyo adeegyada jira waxaad ka heleysaa shirkadaha diyaaradaha.

### 9.4 Baabuur aad leedahay

Qofka waxaa suuragal u ah in lacag ahaan laga kaalmeeyo kharashka kaga baxa gadashada baabur, gelidda iskuulka lagu barto baaruur wadidda iyo hawlaha baabuurka wax lagaga beddeleyo.

Taageerooyinkan oo ay degmadu bixiso waa kuwo laga fekero oo ma aha kuwo uu qofka naafada ah si toos ah xaq ugu leeyahay.

**Iskuulka lagu barto baabuur wadidda (Autokoulu):** Qofka naafada ah si uu u qaato laysanka baabuurta, degmada ayuu ka heli karaa kaalmo lacag ah. Kaalmada waxaa laga dalbadaa xafiiska sooshalka ee degmada uu qofku ka tirsan yahay.

**Gadashada baabuur:** Qofka naafada ah wuxuu heli karaa in lacagta uu baabuurka ku gatay qaar loo soo celiyo, haddii baabuurku uu lagama maarmaan yahay, qofka naafanimadiisa ama jirradiisa darteed. Lacagta qofka loo soo celinayaa waa qiyaastii baabuurka qiimaha uu ku soo gatay kala bar. Lacagtan qofka loo soo celiyo waxaa ogolaadaa waaxda sooshalka ee degmada.

**Canshuuridda baabuurka:** Finland qofku markuu baabuur gato wuxuu bixiyaa canshuura baabuurka. Hase yeeshee qofka naafada ah wuxuu heli karaa in canshuurta baabuurka loo soo celiyo, haddii heerka cilladda ee naafanimadiisu ay aad u sarayso, baabuurkuna uu qofka lagama maarmaan u yahay si uu meeluhuu rabo u tegi karo. Soo celinta canshuurta waxaa laga dalbadaa Waaxda Kastamka Koonfureed, Kastamka Hanko (Eteläinen Tullipiiri Hangon tulli).

**Hawlaha baabuurka wax lagaga beddelayo (Auton muutostyö):** Qofka naafadiisa ama jirradiisa darteed ayaa mararka qaar waxaa khasab noqota, in baabuurka wax laga beddelo. Beddelidda noocaas ah waxay noqon kartaa tusaale ahaan wiishka kursiga curyaamiintu ku socda baabuurka lagu saaro. Kharashka ku baxa hawlaha baabuurka wax laga beddelayo waxaa laga codsan karaa xafiiska sooshalka ee degmada.

**Ogolaanshaha baarkinka naafada:** Qofka aad naafada u ah wuxuu booliska ka heli karaa ogolaanshaha baarkinka. Ogolaanshuhu wuxuu xuquuq kuu siinayaa inaad baabuurka dhigan karto baarkinada naafada. Ogolaanshuhu waa lacag.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa booliska

### 9.5 Hagidda aqoonta socodka

Dadka aragga naafada ka ah waxay heli karaan hagidda aqoonta socodka. Ujeedada laga leeyahayna waa qofku inuu barto deegaanka isaga muhiimka u ah inuu iskii si nabadgelyo leh u socon karo.

Hagidda aqoonta socodka waxaa bixiya isbitaallada dhexe, iskuullada dadka aragga naafada ka ah iyo waaxda sooshalka ee degmada.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa tusaale ahaan Xarunta Dhexe ee Ururka Naafada Aragga (Näkövammaisten Keskusliitto).

## 10 CAAWIYAYAAL

### 10.1 Caawimo shakhsi ahaaneed

Dadka aad naafada u ah waxay xaq u leeyihiin inay helaan caawimo shakhsi ahaaneed oo lagu caawinayo guriga iyo meelaha kale ee aan guriga ahaynba.

Caawimada shakhsi ahaaneed waa mid uu qofku toos xaq ugu leeyahay. Xuquuqda tooska ah macneheedu waa, haddii qofku buuxinayo shuruudaha caawinada lagu helo, degmada waxaa waajib ku ah inay qofka u qabanqaabiso caawimo shakhsi ahaaneed. Degmadu ma diidi karto inay qofka u qabanqaabiso adeegga oo tusaale ahaan sabab kama dhigan karto xaaladeeda lacageed.

Qofku wuxuu heli karaa in laga caawiyo tusaale ahaan waxyaabahan soo socda oo kale:

- cunto samaynta
- nadaafadda
- daryeelka dharka (dhar dhiqidda iwm.)
- ka soo danaysiga meelaha kale ee aan guriga ahayn
- waxbarashada ama shaqada
- hiwaayadaha (harrastus)
- waxyaabaha kale ee ka qaybqaadashada bulshada.

Caawiyaha shaqadiisu ma aha inuu qofka naafada ah shaqaduu qaban lahaa u qabto, ee waa inuu qofka naafada ah ka caawiyo waxyaabaha naafadiisa ama jirradiisa darteed dhibka ku ah.

Caawimada shakhsi ahaaneed waxaa laga dalbadaa degmada xafiiskeeda sooshalka waaxda adeegyada naafada. Caawimada shakhsi ahaaneed waa adeeg lacag la'aan ah.

### 10.2 Eyga dadka indhaha la' haga

Dadka aragga naafada ka ah waxay heli karaan ey loo tababaray inuu hago, eygaasi wuxuu qofka aragga naafada ka ah ka caawinayaa siduu u socon lahaa deegaan aanu aqoon.

Eyga dadka indhaha la' haga waxaa laga dalbadaa isbitaalka dhexe ee uu qofku ka tirsan yahay.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Iskuulka Eyda Wax Hagta ee Xarunta Dhexe ee Ururka Naafada Aragga (Näkövammaisten Keskusliiton opaskoirakoulu).

### 10.3 Ey caawiye ah

Qofka socodka naafada ka ah wuxuu heli karaa ey tababaran oo caawiye ah oo qofka ka caawiya waxyaabo badan oo hawlaha nolol maalmeedka ah. Eygu wuxuu tusaale ahaan riixi karaa iswiijka nalka laga demiyo, kursiga curyaaminta wuu jiidaa markuu bannaanka beref dhulka yaallo, alaabta wuu keenaa, kor buu u qaadaa, meel buu geeyaa.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan eyga caawiyaha ah waxaa laga helaa Ururka naafada (Invalidiliitto).

## 11 TURJUBAANNO

### 11.1 Dadka waddanka u soo guurey (Maahanmuuttajat)

Qofka afkiisa hooyo uu yahay af kale oo aan ahayn af Finnish ama Iswiidhish, wuxuu xaq u leeyahay inuu turjubaan isticimaalo, markuu shaqaalaha maamulka la joogo oo arrimo kala xaajoonayo. Ujeedada laga leeyahay adeegga turjubaanku waa in dadka sida joogtada ah waddanka u deggan ay awoodaan inay isticimaalaan adeegyada dowliga ah, shaqaalaha maamulkana arrimaha jira kala hadli karaan.

Haddii arrintu ka timaado shaqaalaha maamulka, markaas shaqaalaha maamulka ayay tahay inuu turjubaan ballamiyo.

Haddii falanqaynta arrinku ka timaado qofka macaamiisha ah, markaas waa inuu isagu bixiyaa kharashka turjubaanka.

### 11.2 Dadka leh naafo maqalka ah, dadka leh naafo maqalka iyo aragga ah iyo dadka leh naafo hadalka ah

Dadka aad naafada uga ah xagga maqalka, maqalka iyo araggaba iyo hadalku waxay xaq u leeyihiin adeeg turjubaan. Turjubaanku wuxuu qofka ka caawin karaa waxbarashada, shaqaynta, danaysashada iyo waxqabadyada wakhtiyada firaaqada ah.

Adeegga turjubaanka waxaa laga codsadaa Xarunta Adeegga Turjubaannidda Naafada ee Hay’adda Hawlgabka Qaranka (Kelan Vammaisten tulkkauspalvelukeskus).

## 12 DARYEELKA CAAFIMAADKA

Kharashka ku baxa daryeelka caafimaadka waxaa taageero iyo u soocelin laga heli karaa Kelada iyo degmada uu qofku ka tirsan yahay.

### 12.1 Daawooyinka

Kelada ayaa laga heli karaa inay kharashka dawooyinka ku baxa qay kaa bixiso. Daawooyinka kharashkooda ay Keladu qayb bixiso waa daawooyinka uu dhakhtar soo qoray.

Sida caadiga ah farmashiyaha ayaa markaad kaarka Kelada (Kela-kortti) tusto si toos ah kaaga dhimaya intay Keladu kuu magdhebi lahayd. Qiimaha daawada lagaa dhimayaa wuu kala duduwan yahay. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Kelada.

### 12.2 Caddadka ugu badan ee kharashka daryeelka caafimaadka

Waxaa jira degmooyin badan oo adeegyadoodu caafimaadku lacag yihiin. Hase ahaatee lacagta la bixinayaa waxay leedahay xad, kaas oo ah caddadka ugu badan ee uu qofku bixinayo sannadkii. Sannadka 2011 xadka kharashku wuxuu ahaa 633 euro.

Kharashka ugu badan ee qofka laga qaadaa wuxuu saameeyaa tusaale ahaan biilka dhakhtarka rugta caafimaadka, biilka bolikiliniga isbitaalka iyo biilka marka uu qofku muddo gaabo ku jiro meel daryeel caafimaad oo lagu hayo (laitoshoito). Laakiin xisaabta kharashka ugu badan laguma daro tusaale ahaan biilka daryeelka ilkaha, biilka ambalaaska iyo biilalka warqadaha dhakhtarku qoro (lääkärintodistus).

Marka xadka ugu badnaa ee loogu talagalay buuxsamo, qofku adeegyada daryeelka furan wuxuu helayaa iyadoo aan lacag laga qaadayn. qofku waa inuu isagu la socdaa wakhtiga uu xadkii ugu badnaa buuxsamayo. Risiidhada orijinaalka ah ee aad ku bixisay biilasha hayso.

## 13 BAXNAANINTA DHAQANCELINTA IYO QALABKA CAAWINTA

Qofka aad naafada u ah wuxuu baxnaanin dhaqancelin ah ka dalban karaa Kelada, degmadiisa ama shirkadda caymiska.

Keladu waxay qabanqaabisaa baxnaanin dhaqancelin oo daaweyn ah iyo baxnaanin dhaqancelin oo laga fekero. Baxnaaninta dhaqancelinta ah ujeedada laga leeyahay waa in qofka naafada ah la caawiyo si uu isu debero nolol maalmeedkiisa iyo in la caawiyo si kor loogu soo qaado awoodiisa wax qabsasho.

Daryeelka caafimaadka ee degmada ayaa qofka aad u naafoobey, isla markuu noofoobaba u qabanqaabisa baxnaanin dhaqancelin, taas oo ah mid la xiriirtadaryeelka bukaanka.

Shirkadda caymisku waxay kharashka baxnaaninta dhaqancelinta bixisaa, haddii qofku ku naafoobo shil aan ku talagal ahayn. Magdhowga shirkadda caymisku bixiso waxaa hela qofka markuu shilku ku dhacay, caymiska shilalka ku lahaa mid ka mid ah shirkadaha caymiska.

### 13.1 Tababarka la qabadsiinta

Koorsooyinka tababarka la qabadsiinta waxaa loo qabanqaabiyaa dad jirrooyinkoodu kala duwan yihiin iyo dad da'doodu kala duwan tahay. Tababarka la qabadsiinta waxaa ka qaybqaadan kara, tusaale ahaan qoyska leh ilmo naafo ah.

Koorsooyinka ujeedada laga leeyahay waa in la caawiyo dadka naafada ah iyo ehelkooda, si ay ula qabsadaan isbeddelka noloshooda ku yimi ee naafadu keentay. Koorsooyinka marka la dhiganayo waxaa la helaa tusaale ahaan aqoonta ku saabsan naafada ama jirrada.

Koorsooyinka tababarka la qabadsiinta waxaa qabanqaabiya ururada naafooyinka, Kela iyo qolyaha kale ee bixiya adeegyada baxnaaninta dhaqancelinta. Kharashka koorsooyinka waxaa bixiya Kela ama qofka degmadiisa ama shirkadda caymiska.

Kharashka safarka baxnaaninta dhaqancelinta waxaa magdhow laga heli karaa Kelada. Mararna kharashka safarka waxaa laga heli karaa cidda qabanqaabinaysa baxnaaninta dhaqancelinta.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Kelada ururada naafada.

### 13.2 Qalabka caawimada

Qofka naafada ah qalabka caawimada ee uu u baahan yahay wuxuu ka heli karaa qolada daryeelka caafimaadka ee degmadiisa.

Qalabka caawimada ee aasaasiga ah, sida kursiga curyaamiinta ama usha cad ee indhoolayaasha, rugta caafimaadka ayaa sida caadiga ah qofka u qabanqaabisa. Qalabka caawimada ee qaaliga ah, sida kursiga curyaamiinta ee korontada ku socda, telefishanka akhriska (lukutelevisio) ama qalabka kombiyuutarka waxaa ogolaada isbitaalka dhexe. Dadka naafada ah lacag la'aan bay ku helaan qalabka caawimada. Sidoo kale qalabka dib u habayntooda, cusboonoysiintooda iyo baridda sida loo isticimaalo waa adeegyo lacag la'aan ah.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa qolada daryeelka caafimaadka ee degmada. Faahfaahin ku saabsan qalabka caawimada waxaa kaloo la weydiin karaa ururada naafada.

## 14 WAXBARASHO

Waddanka Finland qof walba xaq buu u leeyahay inuu waxbarto, xitaa dadka aad naafada u ah. Ardayda naafada ah waxay wax ka baran karaan iskuuladda caadiga ah ama macadada waxbarashada ee caadiga ah, iyagoo ardayda kale wax la baranaya. Waxay kaloo wax ka baran karaan iskuullo ama macadyo u gaar ah. Ardayda naafada ah waxaa iskuullada iyo macadyada loogu qabanqaabin karaa taageero iyo caawino, si ay u waxbarashadu ugu suurowdo.

### 14.1 Barashada af Finnishka

Barashada af Finnishku waxay caawinaysaa la qabsashada Finland. Koorsooyin af Finnishka lagu barto waxaa qabanqaabiyo goobaha waxbarashada ee kala duwan iyo ururada shacabka.

Qofku markuu dhalashada Finland dalbanayo waxaa looga baahan yahay, inuu af Finnishka ama af Iswiidhishka hadal ahaan iyo qoraal ahaanba ka yaqaanno ilaa heer ku filan. Waxaa iyana ku filan, hadduu qofku yaqaan afka faro ka hadalka ee Finland.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan barashada af Finnishka waxaa laga helaa tusaale ahaan, xafiiska shaqada iyo xoogsashada iyo goobaha wax lagu barto.

### 14.2 Xirfad doorasho

Cilminafsiyaqaannada xirfad doorashada ayaa haddii loo baahdo qofka ka caawiya siduu u heli lahaa xirfad iyo waxbarasho ku haboon. Cilminafsiyaqaannada xirfad doorashada ayaad isla samayn kartaan qorshe waxbarasho, iyadoo la tixgelinayo saamaynta ay naafadaada ama jirradaadu ku yeelan karto waxbarashada. Cilminafsiyaqaannada xirfad doorashadu waxay ka shaqeeyaan xafiiska shaqada iyo xoogsashada (työ- ja elinkeinotoimisto).

Cilminafsiyaqaannada xirfad doorashadu waxay kaa qaadi karaan imtixaan tijaabo ah oo lagu qiyasayo waxa aad ku haboon tahay. Imtixaanka jawaabtiisu waxay sheegaysaa, inuu jiro nooc xirfad ah oo aad ku haboon tahay. Cilminafsiyaqaanadu waxay kaloo qabanqaabiyaan booqashooyin lagu soo arko goobaha shaqada iyo goobaha waxbarashada.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa xafiiska shaqada iyo xoogsashada, Kelada iyo ururada naafada.

### 14.3 Iskuullada khaaska ah ee xirfadaha

Kuwa naafada ah, kuwa jirro wakhti dheera ah qaba iyo dadka kale ee dhallinyarada iyo qaangaarka ah ee u baahan taageero khaas ah, waxay wax ka baran karaan iskuullada khaaska ah ee xirfadaha. Iskuulladaas waxaa kaloo waxbarasho iyo baxnaanin dhaqancelin ah lagu siiyaa dadka aad naafada u ah. Iskuullada noocan ah waxay ku yaallaan meelo badan oo Finland ah.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Guddiga Waxbarashada (Opetushallitus) iyo ururada naafada.

### 14.4 Caawiyayaal

Ardayga aad naafada u ah wuxuu xaq u leeyahay, inuu helo caawiye shakhsi ahaaneed oo ka caawiya tusaale ahaan, socoshada, cuntaynta ama qoritaanka casharada.

Caawiye waxaa laga dalbadaa xafiska sooshalka ee degmada.
Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa xafiiska sooshalka.

### 14.5 Taageerada safarka iskuulka

Kela waxay ardayga naafada ah u ogolaan kartaa taageero safarka iskuulka ah. Waxaase shuruud u ah, in aanu ardaygu qolada adeegga naafada ka helin gaadiid uu iskuulka ku tago.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan taageerada safarka iskuulka waxaa laga helaa Kelada iyo goobaha waxbarashada.

### 14.6 Taageero ah dhaqaale lagu noolado wakhtiga waxbarashada

Finland habab badan baa dhaqaale ahaan waxbarashada loo taageeraa. Waxbarashada waxaa lagu maalgelin karaa tusaale ahaan, lacagta taageerada waxbarashda (opintotuki).
Warar ku saabsan siyaabaha kala duwan ee ay suuragalka tahay in waxbarashada loo maalgeliyo waxaad ka heleysaa Kelada iyo macadada waxbarashada.

**Lacagta taageerada waxbarashada:** lacagta taageerada waxbarashadu waxay ka kooban tahay lacagta waxbarashada, taageeridda ijaarka ee ardayda iyo deynka ardayda ee dowladdu dammiinka ka noqoto. Ardaygu wuxuu lacagta taageerada waxbarashada heli karaa, haddii hawshiisa guud tahay waxbarasho uu baranayo ugu yaraan laba bilood. Ardaygu haddii uu qaato taageerooyin kale, sida hawlgabka ama lacagta baxnaaninta dhaqancelinta, ma heli karo lacagta taageerada waxbarashada.
Lacagta taageerada waxbarashada waxaa laga dalbadaa Kelada.

**Taageerada ijaarka ee ardayda:** Ardaygu wakhtiga uu waxbaranayo wuxuu heli karaa taageero lagaga caawinayo kharashka ijaarka guriga. Taageerada ijaarka ee ardayda waxaa la siiyaa ardayga deggan guri ijaar ah.
Taageerada ijaarka ee ardayda waxaa laga dalbadaa Kelada.

**Deynka ardayda:** Dowladda waxay dammiin ka noqon kartaa in ardayga la siiyo deynka ardayda. Deynkaasna ardaygu wuxuu bixiyaa markay waxbarashadu u dhammaato ka dib. Dulsaarka, bixinta deynka iyo arrimaha kale ee deynka la xiriira ardaygu wuxuuu kala heshiinayaa bangiga.
Inay dowladdu dammiin ka noqoto deynka ardayda waxaa laga dalbadaa Kelada.

**Taageerada waxbarashada dadka waaweyn:** qofka weyn ee ardayga ah wuxuu taageerada waxbarashada dadka waaweyn heli karaa, haddii uu nolosha shaqada ku soo jirey ugu yaraan 8 sano oo uu rabo inuu waxbarto. Waxbarashadu waxay noqon kartaa laanta cilmiga ee uu qofka weyn ee ardayga ah hore u soo bartay ama laan kale oo cilmi ah. Taageerada waxbarashada dadka waaweyn waxaa laga dalbadaa Qasnadda Waxbarashada (koulutusrahasto).

Qofka weyn ee ardayga ah wuxuu kaloo waxbarashadiisa ku maalgelin karaa deynka ardayda ee dowladdu damiinka ka noqoto. Dammiinashada deynka ardayda waxaa laga dalbadaa Kelada.

**Taageerada ay Keladu siiso ardayda aan caafimaadkoodu buuxin:** Keladu waxay taageertaa baxnaaninta dhaqancelinta ah ee uu qofka naafada ama bukaanka ah xirfad ku helayo. Taageeradu waxay noqon kartaa qabanqaabinta baaritaannada lagu ogaanayo xirfada uu qofku dooranayo ama qabanqaabinta shaqo tijaabin. Keladu waxay bixisaa kharashka waxbarashada baxnaaninta dhaqancelinta ah, ardaygana waxay siisaa lacagta baxnaaninta dhaqancelinta.

Taageerada waxaa laga dalbadaa Kelada.
Keladu waxay kaloo la socotaa siday waxbarashadu hore ugu socoto, sidaas darteed ardaygu waa inuu Kelada u soo diraan shahaadooyinkiisa caddayna hadba heerka ay waxbarashadu marayso.

**Taageerada caymiska ama taageerada hawlgabka ee ardayda:** Caymiska ama hawlgabka ayaa bixin kara kharashka waxbarashada. Tusaale ahaan haddii shil gaadiid oo qofka ku dhacay ama jirro xirfadda shaqadu sababtay dartood ay noqoto inuu qofku xirfadd cusub barto, waxaa suuragal ah inuu caymisku bixiyo kharashka waxbarashada ka yimaada. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa hay'ada caymiska hawlgabka shaqada (työeläkevakuutusyhtiö) iyo Ururka Caymiska Baxnaaninta dhaqancelinta (Vakuutuskuntoutus VKK ry).

**Lacagaha caawimada iyo abaalmarin waxbarasho (Apurahat ja stipendit):** Waxaa suuragal ah in waxbarashada la maalgeliyo, iyadoo la dalbanayo lacagaha caawimada iyo abaalmarin waxbarasho. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa ururada naafada ee kal duwan.

## 15 SHAQO

Qof walba xaq buu u leeyahay shaqo iyo dhaqaale uu ku noolaado.
Finland dad badan oo naafo ah baa nolosha shaqada ka qaybqaata (shaqeeya). Shaqobixiyayaalku waxay heli karaa taageero iyo magdhow, haddii qofka naafada ah ee la shaqaalaynayo dartiis ay noqoto in goobta shaqada waxyaabo khaas la qabanqaabiyo.

### 15.1 Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashada

Xafiisyada shaqada iyo xoogsashadu (TE-toimistot) waxay dadka ka caawiyaan siday shaqo u raadsan lahaayeen.
Xafiiska shaqada iyo xoogsashada la taliyayaashiisa iyo cilminafsiyaqaannadiisa xirfad doorashadu waxay dadka ka caawiyaan siday u raadsan lahaayeen shaqo ama waxbarasho ku haboon.

Xafiisyada waxaa kaloo ka shaqeeya shaqaale aqoon dheeraad ah u leh shaqo u raadinta dadka naafada ama bukaanka ah. Shaqaalahaas baad kala tashan kartaa tusaale ahaan, haddii aad shaqada darteed u baahan tahay waxyaabo gaara, sida qalab shaqada kaa caawiya ama caawimooyin kale.

Xafiisyada shaqada iyo xoogsashadu (TE-toimistot) waxay kaloo dadka waddanka u soo guurey u qabanqaabiyaan waxbarasho af Finnishka ah.

Xafiisyada shaqada iyo xoogsashadu waxay kaloo qabanqaabiyaan waxbarashooyin shaqaaloobidda ah oo loogu talagalay dadka shaqa la'aanta ah ama dadka ay suuragalka tahay inay shaqa la'aan ku dhacdo. Waxbarashada noocaas ah dadka naafada ah iyo kuwa bukaanka ahba way dalban karaan.

Adeegyada xafiiska shaqada iyo xoogsashadu waa lacag la'aan. Ururada naafada ayaa iyana waxay leeyihiin adeegyo taageera shaqaaloobidda.

### 15.2 Waxqabad shaqo oo baxnaaninta dhaqancelinta ah

Degmooyinku waxay waxqabad shaqo u qabanqaabiyaan dadkooda muddada dheer shaqo la'aanta ahaa. Xafiiska sooshalka ee degmada, xafiiska shaqada iyo xoogsashada iyo qofka ayaa si wadajir ah go'aan uga wada gaara nooca waxqabadka shaqo ama waxbarasho ee qofku uu u baahan yahay.

Waxqabadka shaqo waxaa loo qabanqaabiyaa

gaar ahaan dhalllinyarada da'doodu ka yar tahay 25 sano. Waxqabadka shaqadu waa dhawr bilood ilaa hal sano. Qofkan waxqabadka shaqada ka qaybqaadanaya lama siiyo mushahar caadi ah, laakiin lacagtiisa shaqa la'aanta ayaa xoogaa dheeraad ah loogu daraa. Degmaduna waxay bixisaa kharashka qofka kaga baxa safarka shaqada.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa xafiiska shaqada iyo xoogsashada iyo xafiiska sooshalka ee degmada.

### 15.3 Shaqo la taageeray

Dadka naafada ah ama aanay awoodooda waxqabadku buuxin waxay heli karaan shaqo la taageeray. Shaqada la taageeray waa shaqo caadi ah oo laga shaqaynayo tusaale ahaan, dukaan ama xafiis. Qofka shaqaalaha ahna shaqada mushahar baa lagu siiyaa.

Shaqada helideeda iyo shaqada ka soo bixideeda waxaa qofka ka caawiya qof tababare shaqo ah. Waxaa suuragal ah inuu tababaruhu bilowga hore qofka shaqada u raaco oo hubiyo in shaqaaluhu helayo caawimo iyo taageero, si uu u barto shaqada la qabanayo.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shaqada la taageeray waxaa laga helaa degmooyinka waaxda u qaabilsan adeegyada naafada, xarumaha shaqada iyo ururada naafada ee kala duwan.

### 15.4 Dib u dhigashada hawlgabka

Hawlgabka buuxa ee awoodid la'aanta shaqada ee Keladu bixiso dib baa loo dhigan karaa. Arrintan macnaheedu waa, qofka lacagta hawlgabka qaataa, muddo go'an ayuu shaqada dib ugu noqonayaa, muddadaasna lacagta hawlgabka ma qaadanayo. Muddada shaqada tijaabo ahaan dib loogu noqonayaa waxay noqon kartaa ugu yaraan saddex bilood, ugu badnaanna labo sano. Muddadaas qofku xuquuqdiisa hawlgabka ma luminayo. Mushaharka mooyee qofku wuxuu kaloo Kelada muddo labo sano ah ka heli karaa caddadka ugu badan ee taageerada naafada ah.

Sababtu waxay doontaba ha noqotee, hadday qofka u suuroobi weydo inuu shaqeeyo, hawlgabkii buu dib ugu soo noqonayaa.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Kelada.

## 16 QOYSKA

Qof walba xaq buu u leeyahay, inuu qoys yeesho. Finland bulshadu siyaabo badan bay qoyska u taageertaa. Qoysasku waxay heli karaa noocyo kala duwan oo taageerooyin dhaqaale ah iyo weliba hagid iyo la talin.

### 16.1 Haynta carruurta

Waalidku ilmohooda gurigay ku haysan karaan ama waxay u dalbi karaan xannaano maalmeed carruurta lagu hayo oo degmadu leedahay.

**Taageerada haynta ilmaha:** Haddii qoysku ilmo 3 sano ka yar guriga ku haysto, waxaa qoyska lagu siiyaa lacagta ah taageerada haynta carruurta. Lacagta taageerada ah intay tahay waxaa saamayn ku yeesha tusaale ahaan, ilmaha da'diisa iyo tirada carruurta ay walaalaha yihiin. Taageerada haynta ilmaha qoyska lama siiyo, haddii ilmuhu boos xannaano ku leeyahay xannaano maalmeedka degmada.

**Xannaano maalmeedka degmada:** ilmaha aan weli da'da iskuulka gaarin, wuxuu xaq u leeyahay xannaano maalmeedka degmada. Xannaano maalmeedka ilmaha lagu haynayaa waxay noqon kartaa xannaano ama qof shaqaale ah oo guriguu isagu deggan yahay ilmo ku haya.
Boosaska xannaano maalmeedka waxaa laga dalbadaa xannaanooyinka degmada ama xafiiska sooshalka.
Kharashka xannaanada ee qoyska laga qaadayo wuxuu ku xiran yahay dakhliga qoyska soo gala.

### 16.2 Adeegga guriga

Dadka waayeelka ah, naafada iyo kuwa jirro muddo dheer ah leh waxaa suuragal u ah, inay helaan adeegga guriga ee degmada. Adeegga guriga shaqada uu qabtaa waa tusaale ahaan, in qofka laga caawiyo sida, qubeyska iwm.

Adeegga guriga waxaa laga dalbadaa xafiiska sooshalka ee degmada.

### 16.3 Taageerada haynta ehelka

Taageerada haynta ehelka waxaa heli kara qofka guriga ku haya qof ehelkiisa ah oo naafo ah ama jirran. Ujeedada taageerada laga leeyahay waa in qofka ehelka ah ee naafada ah ama jirran aanay khasab noqon in la geeyo xero lagu hayo, ee uu ku noolaan karo gurigiisa.

Lacagta taageerada haynta ah intay noqonayso waxay ku xiran tahay, hadba siday u culus tahay hawsha daryeelidda ah ee qofku u baahan yahay. Haddii qofka ehelka ah afar iyo labaatanka saac u baahan yahay

daryeel, taageerada daryeelku way badan taha. Degmooyinku way ku kala duwan yihiin caddadka taageerada haynta ehelka ee ay bixiyaan.

Taageerada haynta ehelka waxaa laga dalbadaa xafiiska sooshalka ee qofka degmadiisa.

### 16.4 La talin iyo taageerid

**Xarumaha daryeelka caafimaadka hooyada iyo carruurta** (Neuvolat)**:** Xarunta daryeelka caafimaadka carruurta waxaa laga helaa caawimo iyo talooyin ku saabsan arrimaha la xiriira koriinka ilmaha. Xaruntu waxay la socotaa koriinka barbaaridda ilmaha, ilmaha xarunta ayaa lagu tallaalaa, waalidka waxaa lagu taageeraa siday hawsha haynta ilmaha u kari lahaayeen.

Xarunta la talinta qoyska (perheneuvola) waxaa lala soo xiriiri karaa tusaale ahaan, hadday jiraan furitaan, ilmaha oo iskuulka dhibaato kala kulma ama xaalado kale oo adag oo qoyska la soo gudboonaada. Xarunta la talinta qoyska waxaa kaloo suuragal ah in lagala sheekaysto ilmaha welwelkiisa iyo cabsidiisa iyo waxyaabaha la xiriira koriinka ilmaha.

LFaahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa qofku degmada uu deggan yahay xarunteeda daryeelka caafimaadka hooyada iyo carruurta (neuvola).

**Terabiga labada isqaba iyo terabiga qoyska:** Arrimaha ku saabsan dhibaatooyin ku yimaada xiriirka labada isqaba waxaa caawimo looga heli karaa terabiga laba isqaba iyo terabiga qoyska. Terabiga ayaa si wadajir ah xal loogu raadinayaa dhibaatooyinka jira, sida dagaalanka qoyska dhexdiisa, dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda ama dhibaatooyinka mukhaadaraadka maanka dooriya. Waxaad kaloo terabiga taageero ka heli kartaa, haddii qof ehelka ah jirrado ama geeriyoodo.

Terabiga labad isqaba iyo terabigu qoysku waa lacag la'aan. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heleysaa shaqaalaha sooshalka degmada.

**La talinta arrimaha sekshiwalka:** La talinta arrimaha sekshiwalka waxaad ka heleysaa warar iyo talooyin ku saabsan arrimaha la xiriira sekshiwalka.
La talinta waxaad kala sheekaysan kartaa tusaale ahaan siduu dhaawacu ama jirradu u saamayn karaan sekshiwalka, dhibaatooyinka wasmada iyo dhibaatooyinka la xiriira nolosha dareenka iyo xiriirka dadka ka dhexeeya.

La talinta sekshiwalka waxaad ka heli kartaa rugaha caafimaadka iyo xarumaha baxnaaninta dhaqancelinta. Waxaad kaloo telefoon ahaan talooyin kaga heli kartaa tusaale ahaan, SexpoSäätiö ama Ururka Dadweynaha (Väestöliitto).

## 17 WAKHTIGA FIRAAQADA AH

Qaadashada wakhtiga firaaqada ah iyo hiwaayadaha (harrastus) waxaa suuragal ah in lagaa taageero, haddii naafo ama jirro darteed ay dhib tahay in la isticimaalo adeegyada ama qalabka caadiga ah.

**Hiwaayadda jimicsiga:** Degmooyinku waxay dadka naafada ah iyo kuwa jirran u qabanqaabiyaan fursado jimicsi oo kala duwan. Dadka kooxaha gaarka ah waxay heli karaan tusaale ahaan, kaarka dabaasha oo raqiis ah, oo ay ku geli karaan berkedaha dabaasha ee degmada.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha jimicsiyada weydii waaxda jimicsiyada ee degmadaada ama ururada isboortiga iyo ururada naafada.

**Qalabka hiwaayadaha:** Qofka naafada ah ama jirran wuxuu heli karaa in loo magdhabo haddii hiwaayadiisa ama qaadashada wakhtiga firaaqada ah dartood uu u baahan yahay qalab dheeraad ah. Qalabka hiwaayadda waxaa laga dalban karaa xafiiska sooshalka ee qofka degmadiisu leedahay.

**Adeegyada dhaqanka (kulttuuripalvelut):** Dhaqanka waxaa loola jeedaa tusaale ahaan, tiyaatarka, munaasabadaha muusigga, farshaxanka la soo bandhigo (taidenäyttely) iyo filimada.

Dadka hawlgabka ah waxay heli karaan in qiimaha tigidhada wax laga dhimo. Qofku hadduu u baahan yahay qof la socda, qofkaas la socdaa lacag la'aan buu ku gelayaa tusaale ahaan, muusiyamka iyo riwaayadaha. Shinoomooyinka iyo tiyaataraddu waxay leeyihiin meelo loogu talagalay dadka kursiga curyaamiinta wata.

Qofka naafada socodka ah waxaa fiican inuu hore u soo ogaado in meesha lala soo geli karo kursiga curyaamiinta.

**Fasaxyada:** Ururo badan oo ah ururada naafada iyo kuwa hawlgabka ayaa dadka ka tirsan waxay siiyaa safarro dalxiis ama baxnaanimo dhaqancelin ah oo kala duduwan. Sida caadiga ah qofka naafada ah waa inuu isagu iska bixiyaa qayb ka mid ah lacagta safarka dalxiiska ama baxnaaninta dhaqancelinta ah.

Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa ururada.

## 18 MEELAHA LAGALA SOO XIRRIRO

Liiskan hoos ku qoran waxaa la isugu keenay meelaha laga soo xiriiro qolyaha kala duwan ee ah ururada shacabka, iskaashatooyinka iyo qolyaha kaleba. Iskaashatooyinka deegaamooyinka ka jira meelaha lagala soo xiriiro waxaa laga helaa xarunta dhexe ee ururka iskaashatadu ka tirsan tahay.

URURKA MASKAXDA
(AIVOLIITTO RY)
Suvilinnantie 2
20900 TURKU
tel. 02 2138 200
www.aivoliitto.fi

URURKA NAAFADA MASKAXDA
(AIVOVAMMALIITTO RY)
Nordenskiöldinkatu 18 A
00250 Helsinki
tel. 09 8366 580
www.aivovammaliitto.fi

URURKA AUTISMIGA IYO ASPERGER
(AUTISMI- JA ASPERGERLIITTO RY)
Kaupintie 16 B
00440 HELSINKI
tel.09 7742 770
www.autismiliitto.fi

URURKA EPILEPSIGA
(EPILEPSIALIITTO)
Malmin kauppatie 26
00700 Helsinki
tel. 09 350 8230
www.epilepsia.fi

URURKA ISBOORTIGA EE DHAQAMADA KALA DUWAN EE FINLAND
FINNISH MULTICULTURAL SPORTS FEDERATION, FIMU RY
SUOMEN MONIKULTTUURINEN LIIKUNTALIITTO RY
Kivensilmänkuja 2, dabaqa 3aad
000920 Helsinki
tel. 050 5511 197
www.fimu.org

URURKA XUQUUQDA BINI-AADANKA
(IHMISOIKEUSLIITTO)
Döbelninkatu 2, dabaqa 8aad
00260 HELSINKI
tel. 09 4155 2500
www.ihmisoikeusliitto.fi

BANGIGA WARARKA
(INFOPANKKI)
Helsingin kulttuurikeskus
PL 4795
00099 Helsingin kaupunki
www.infopankki.fi

URURKA XARUNTA INKERI
(INKERIKESKUS RY)
Hämeentie 103 A
00550 HELSINKI
tel. 09 7534 464
www.inkerikeskus.fi

URURKA NAAFADA
(INVALIDILIITTO RY)
Mannerheimintie 107
00280 HELSINKI
tel. 09 613 191
www.invalidiliitto.fi

URURKA NAAFADA KORIINKA
(KEHITYSVAMMALIITTO RY)
Viljatie 4 A
00700 HELSINKI
tel. 09 348 090
www.kehitysvammaliitto.fi

URURKA TAAGEERIDDA NAAFADA KORIINKA
(KEHITYSVAMMAISTEN TUKILIITTO RY)
Pinninkatu 51
33100 Tampere
tel.03 2403 111
www.kvtl.fi

URURKA 57 EE TAAGEERIDDA KORIINKA NAAFADA
(KEHITYSVAMMATUKI 57 RY)
Bulevardi 34 a A 4
00120 HELSINKI
tel. 0400 345 369
www.kvtuki57.fi

URURKA MAQALKA
(KUULOLIITTO RY)
Ilkantie 4
00400 HELSINKI
tel. 09 5803 830
www.kuuloliitto.fi

URURKA DADKA DHEGAHA LA’
(KUUROJEN LIITTO RY)
Ilkantie 4
00400 HELSINKI
telefoonka hadalka daabaca: 09 580 31/
lambarkalaga gudbiyo
www.kl-deaf.fi

URURKA KYNNYS RY (urur caawiya dadka naafada ah)
Siltasaarenkatu 4, dabaqa 5aad
00530 HELSINKI
tel. 09 6850 110
www.kynnys.fi

URURKA CUDURADA MURQAHA
(LIHASTAUTILIITTO RY)
Läntinen Pitkäkatu 35
20100 TURKU
tel. 02 273 9700
www.lihastautiliitto.fi

XARUNTA DHEXE EE CAAFIMAADKA MASKAXDA
(MIELENTERVEYDEN KESKUSLIITTO)
Ratakatu 9
00120 HELSINKI
tel. 09 5677 730
www.mtkl.fi

MONIHELI/MONIMOS
Työpajankatu 2, dabaqa 2aad
00580 Helsinki
www.moniheli.fi

URURKA XUSUUSTA
(MUISTILIITTO RY)
Luotsikatu 4 E
00160 HELSINKI
tel.09 6226 200
www.muistiliitto.fi

XARUNTA DHEXE EE NAAFADA ARAGGA
(NÄKÖVAMMAISTEN KESKUSLIITTO RY)
Cinwaanka la tago: Marjaniementie 74 (Itäkeskus),
00930 Helsinki
tel. 09 396 041
www.nkl.fi

URURKA LA TALINTA QAXOOTIGA EE ARRIMAHA SHARCIGA
(PAKOLAISNEUVONTA RY)
Kaisaniemenkatu 4 A, dabaqa 6aad
00100 HELSINKI
tel. 075 7575 100
www.pakolaisneuvonta.fi

SELKOKESKUS (Xarunta fududaynta wararka oo hoos tagta Ururka Naafada Koriinka)
Viljatie 4 A
00700 Helsinki
tel. 09 3480 9240, www.selkokeskus.fi

URURKA CP EE FINLAND
(SUOMEN CP-LIITTO RY)
Malmin kauppatie 26
00700 HELSINKI
tel. 09 5407 540
www.cp-liitto.fi

URURKA ISBOORTIGA IYO SOCODKA NAAFADA EE FINLAND
(SUOMEN VAMMAISURHEILU JA -LIIKUNTA VAU RY)
Radiokatu 20, dabaqa 5aad.
00240 Helsinki
tel. 09 4257 9824
www.vammaisurheilu.fi

URURKA DADKA INDHAHA IYO DHEGAHA LA' EE FINLAND
(SUOMEN KUUROSOKEAT RY)
Cinwaanka la tago: Marjaniementie 74, Itäkeskus
00930 Helsinki
tel. 040 7780 299
www.kuurosokeat.fi

URURKA CUDURKA SM EE FINLAND (SUOMEN MS-LIITTO RY)
Xafiiska dhexe (Keskustoimisto)
Vaihemäentie 10
21250 Masku
tel. 02 4392 111
www.ms-liitto.fi

URURKA CAAWIMADA QAXOOTIGA EE FINLAND
(SUOMEN PAKOLAISAPU)
Kaikukatu 3
00530 Helsinki
tel. 09 6962 640
www.pakolaisapu.fi

URURKA CUDURKA DABAYSHA EE FINLAND
(SUOMEN POLIOLIITTO RY)
Kumpulantie 1A, dabaqa 6aad
00520 HELSINKI
tel. 09 686 0990
www.polioliitto.com

URURKA LAANQAYRTA CAS EE FINLAND
(SUOMEN PUNAINEN RISTI, SPR)
Xafiiska dhexe (Keskustoimisto)
Tehtaankatu 1 a
00140 HELSINKI
tel.020 7012 000
www.redcross.fi

URURKA REUMADA EE FINLAND

(SUOMEN REUMALIITTO RY)
Iso Roobertinkatu 20–22 A
00120 HELSINKI
tel. 09 476 155
www.reumaliitto.fi

URURKA TAAGEERIDDA CARRUURTA NAAFADA AH EE FINLAND
(SUOMEN VAMMAISTEN LASTEN TUKI RY)
Eteläinen Hesperiankatu 28 C
00100 HELSINKI
tel. 09 446 663

AASAASIYADDA TAAGEERIDDA CARRUURTA IYO DHALLINYARADA NAAFADA AH
(VAMMAISTEN LASTEN JA NUORTEN TUKISÄÄTIÖ)
Mikonkatu 8 A, dabaqa 9aad
00100 HELSINKI
tel. 09 6829 530
www.vamlas.fi

XARUNTA DHEXE EE URURKA HAWLAHA WAAYEELKA
(VANHUSTYÖN KESKUSLIITTO RY)
Malmin kauppatie 26
00700 HELSINKI
tel.09 350 8600
www.vanhustyonkeskusliitto.fi

URURKA DADWEYNAHA
(VÄESTÖLIITTO)
Kalevankatu 16
00100 HELSINKI
tel. 09 228 050
www.vaestoliitto.fi

XAFIISKA WAKIILKA DADKA TIRADA YAR
(VÄHEMMISTÖVALTUUTETUN TOIMISTO)
Cinwaanka la tago: Mikonkatu 25, Helsinki
Lambarka adeegga macaamiisha: 071 878 8666
www.vahemmistovaltuutettu.fi

## 19 TIXRAAC

Waxbarashada xirfadda ee khaaska ah:
www.ammatillinenerityisopetus.fi

Finlex, bangiga wararka sharciyada ee dowladda:
www.finlex.fi

Bangiga wararka (Infopankki):
www.infopankki.fi

Boggaga internetka ee Ururka Naafada (Invalidiliitto):
www.invalidiliitto.fi

Boggaga internetka ee Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kansaneläkelaitos):
www.kela.fi

Boggaga Wakaaladda Nabadgelyada Gaadiidka (Liikenteen Turvallisuusvirasto):
www.ake.fi

Boggaga internetka ee Gaadiidka Basaska Gobollada (Matkahuolto):
www.matkahuolto.fi

Boggaga internetka ee Xarunta Dhexe ee Naafada Aragga (Näkövammaisten keskusliitto):
www.nkl.fi

Boggaga Iskuulka Eyda Wax Hagta (Opaskoirakoulu):
www.opaskoirakoulu.fi

Boggaga internetka ee Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Caafimaadka (Sosiaali- ja terveysministeriö):
www.stm.fi

Boggaga internetka ee xafiiska shaqada iyo xoogsashada (Työ- ja elinkeinotoimisto):
www.mol.fi

Boggaga internetka ee Valvira:
www.valvira.fi

Shebekadda adeegga ee Verneri (Verneri-verkkopalvelu):
www.verneri.net

Boggaga internetka ee Shirkadda Tareemada Dowladda (VR):
www.vr.fi

Hilma
vammaisten maahanmuuttajien tukikeskus

VAMMAISFOORUMI
Vammaisjärjestöjen yhteinen ääni

RAY TUKEE
ray
RAY STÖDER